



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

**War-qad uu Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramadda Midoobay uu  
u qoray Haweenka Soomaaliyed.**

### **Hooyooyin iyo Walaalayaal ( Gabdho )**

Maanta oo ah 8 Maars 2011, waa maalinta caalamiga ah ee Haweenka Adunka. Waana maalintii ay Qaramadda Midoobay u astaysay u dabaaldegida doorka ay hawaynku kuleeyihin addunka-. koox ama bulsho kasta oo ay katirsanyihiinba. Hadaba haweenka Soomaaliyed meel-kasta ha joogeene, waa in ay istaagan lana dabaaldegaan Hawaynka dunida maaintan muhiimadda leh. Raguna waa in uu muujiyaa sida uu u barbartaaganyahay haweenka maadama ay u halgamayaan sida ay u muujin-lahayeen awoodda iyo xaqa ay kuleeyihiin bulshadha dhexdeeda malintan garka ah .

Waxaan leeyahay haweenka Soomaaliyed oo mudo labaatan sanno ah dhibanayaal ahaa- dhibka dalka kajirta awgeed, maanta waxaad joogtaan maalintii aad marlabaad naftiina u huri-lahaydeen si nabad loogu soo celiyo Soomaaliya isla markaasna looga dhix-helo bulshadda Soomaaliyed sinaanta ragga iyo haweenka. Sida aad horay u muujiseen marar badan, waxaa la joogaa wakhtigii aad muujin la heedeen sida ay idinka go'antahy ladagaalanka qab-qab-layaasha dagaalka , qabiilaysiqa iya fikradaha kudhisan xag-jirnimada. Waxaa xusid mudan xaaladdii adkeed ee haweenka Soomaaliyed ay kula kulmayeen xabadaha iyo handadaada ayaga oo maraaya wadooyinka Muqdisho iyo magaaloyinka kaleba. Haweenkaas oo raadinaayay meel ay ka helaan xasilooni, nabad iyo in ay uhelaan nolalmaameed caruurtooda. Weli haweenku waxaa haysta barakac iyo xad-gudubyo ku-saabsan xquuqul insanka- (waxsan sabab u ah) dagaalka dalka ka jira awgeed. .Waxaa kale oo haweenka dhib kuhaya jiilaalka iyo abaarta meel-walba oo Soomaaliya ah taabatay. Waa in aan dhamaanteena u istaagnaa sida aan waxuga qabanlaheyn una joojin-laheyn dhibaatadaan. Dhibaataduna waxaan wax ka qaban karnaa marka nabad waarta laga helo Soomaaliya oo keliya.

Haweenyahow idinka oo xoogiina kulminaya, rabitaankiinana ka hormumarinayo nabadda, waa in aad u halgantaan sida aad ku-noqonlaheeden dad aan looga maarmiin xalinta khilaafadka iyo nabad samayntuba- heer kastaba ha ahatee. Waxaan boogaadinaya guulaha Ururada Haweenka ee ka-jira bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, Puntland, iyo Somaliland ay gaareen. Dadaalka ururadana wuxuu u eyyahay mid ku wajahan sidii nabad loogu helilahaa Soomaaliya. Fikrada kudhisan si-naanshaha ragga iyo haweenka iyo awodsiinta haweenkuba waa ficiil maalin kasta ka-muuqda wax-qabadkiina iyo go'aanda aad noo wadagaartaan si an uga bad-baadno colaada marwalba



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

soo burqanaysa. Waxqabadkiina/ ama waxtarkiina wuxuu aad u muuqdaa xiliyadda iska-horimasha uu dhaco. Hadaba aan siino haweenka fursdo ay wax-ku hogaamiyaan, go'aan kugaaraan ama ay nabad kusameeyan.

Hooyooyin iyo Gabdhaha walaalahayga ahba, waxaan idinku guubaabinaya idinkana-rajeynayaa in aad kafaideysataan maalintan muhiimadda leh si aad umuujisan awoodina iyo kartidiinaba si aad horay oogu marisaan geedi-sacodka nabadda Soomaaliya. Sanadda 2011 ha ahaato sanad aanku talabsano guul wayn oo ay garwadeyn kayihin haweynka. Waxaad mudantihin in an iduinla barbar istagno taageeradanada buuxda .

Iga gudooma salaan qaali ah

Dr. Augustine Mahiga